Farriintan waxaa la soo galiyay onlaynka iyadoo ku qoran Af اللغة العربية,

English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

Janaayo 16, 2025

Ku: Xubnaha bulshada I/DD, iskaashatada Qabaa'ilka iyo shaqaalaha Xafiiska Adeegyada Korriinka Naafanimada (ODDS)

Ka socoto: Dana Hittle, Agaasime Ku-meelgaar ah, Xafiiska Adeegyada Korriinka Naafada (ODDS)

Mawduuca: Hakinta Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub iyo bixiyeyaasha guriga ee 24-ka saac

Ma nabad baa,

Farriintan waxaa loogu talogalay bulshada naafooyinka garashada iyo koboca (I/DD). Warkaan wuxuu muhiim u yahay:

- Wakaaladaha bixiyaha ee mustaqbalka
- Wakaaladaha bixiyaha ee sugaya in codsiyadooda dib loo eego
- Wakaaladaha bixiyaha ee hadda jira
- Hay'adaha maareynta kiiska

Janaayo 10, ODDS wuxuu ka dalbaday Xarumaha Federaalka ee Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) hakin lix bilood ah oo la doonayo in lagu sameeyo Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub iyo

bixiyeyaasha guriga ee 24-ka saac. Tani waxay uun khuseysaa bixiyeyaasha ODDS uu shatiga siiyo.

## Muxuu macnaha hakintani noqon doonaa?

Haddii CMS ay ansixiyaan, hakinta ayaa bilaaban doonta Febraayo 10, 2025. ODDS intaasi kadib wuu joojinyaa qabashada codsiyada loogu tala galay:

- Wakaaladaha Nooca Caadiga ah ee cusub ee Taageerada Nolosha Bulshada (SMA)
- Wakaaladaha bixiyaha guriga ee cusub ee shaqeeya 24-ka saac.

Waxaanu samaynaynaa hannaan ka reebitaanada loogu tala galay (waxyaabo aan hawsha kujirin). Ka eeg waxyaabo badan oo arrinkaasi ku saabsan hoos.

## Intee hakintu qaadan doontaa?

Waxaanu rajeyneynaa inay qaadato hal sano. Ugu horreyn, CMS waxay ansixin doonaan lix bilood. Intaasi kadib, waxaanu qorshaynay inaanu dalbano lix bilood oo kale.

## Muxuu ODDS sidaan u yeelayaa?

Saddexdii sano ee lasoo dhaafay intii lagu jiray, waxaanu helnay 240% oo ah koror dhanka codsiyada ah kaasi oo ka imaanayay wakaaladaha bixiyaha. Hadda markii la eego inta ay dhan yihiin shaqaalaheenu, ma awoodno inaanu ka shaqeyno dhammaan codsiyada cusub. Waxaa jira dib u dhac dhan 284 marka la eego SMA iyo 114 marka la eego guryaha 24-ka saac. Shaqaalaha ayaa aad u shaqeynaya. Hakinta ayaa siin doonta iyaga

waqti ay ku qabtaan hawsha oo ay kusoo gaaraan halka ay haatan mareyso.

Wax ka qabashada dib u dhaca ayaa sidoo kale waqti ka qaadata xakamaynta bixiyeyaasha. Hakinta ayaa shaqaalaha waqti badan siin doonta si loo xakameeyo bixiyeyaasha cusub iyo kuwa haatan jiraba. Tani waxay dhimi doontaa halista khiyaanada, wax khasaarinta iyo xadgudubka.

### Miyay hakintu saameyn doontaa shakhsiyaadka adeegyada hela?

Maya. Hakintu kuma sii adkeyn doonto qofna helitaanka adeegyada. Waxaanu haynaa SMA iyo bixiyeyaasha 24-ka saac oo aad u badan oo ku kala sugan qeybo badan oo gobolka ah. Bixiyeyaasha ayaa haya ku dhawaad 1,000 fursadood. Tani aad ayay uga badan tahay baahida hadda jirta.

### Ka waran haddii qeybo gobolka ka tirsan ay u baahan yihiin bixiyeyaal intaa ka badan?

Haddii loo baahdo, ODDS waxaa laga yaabaa inuu sameeyo ka reebitaano ama ka dhaafitaano dhanka hakinta ah. Waxaanu dib u eegitaano bille ah ku sameyn doonaa degmooyin waxaana ku samayn doonaa dib u eegitaano asbuucle ah xaaladaha qaarkood si loo hubiyo inay jiraan bixiyeyaal ku filan. Waxaanu samayn doonaa ka reebitaano loogu tala galay SMA-yada cusub iyo bixiyeyaasha guriga ee 24-ka saac gudaha xaafadaha ama bulshooyinka u baahan iyaga. Tusaaleyaasha qaarkood waa:

- Bulshooyinka u baahan bixiyeyaal badan oo isticmaala luuqado aanan ahayn af Ingiriis.

- Bulshooyinka miyiga ee u baahan bixiyeyaal badan.

### Sideebaan u codsan karaa ka reebitaan dhanka hakinta ah?

Waaxda Shati Bixinta ee ODDS ayaa samaynaya hannaan loogu tala galay soo codsashada ka reebitaanada. Waxaanu soo galin doonaa hannaankaan bogga mareegta Wakaaladaha Bixiyaha Mustaqbalka ee ODDS. Haddii aad tahay bixiye mustaqbalka filaya inuu shaqeeyo oo qaba su'aalo, fadlan kusoo dir iimaylkaan dd.licensing@odhsoha.oregon.gov.

### Maxaa xiga oo dhici kara?

Haddii CMS ay ansixiyaan, ODDS wuxuu joojin doonaa aqbalitaanka codsiyada cusub ee SMA iyo bixiyeyaasha 24-ka saac Febraayo 10, 2025. Waxaanu ka shaqeyn doonaa codsiyada aanu helnay taariikhdaas ama maalintaas intaan la gaarin anagoo uga shaqeyn doona sida ay usoo kala horreeyeen.

Hoggaanka ODDS iyo ani ayaa wixii xog ah ee soo kordha had iyo jeer ku wargalin doona nala hawlgaleyaasheena inta shirarka lagu jiro. Haddii isbaddallo ay ku yimaadaan qorshahaan, waxaan soo diri doonaa farriin kale oo bulsho. Haddii aad su'aalo qabtid, fadlan iimaylkaan kusoo dir dd.licensing@odhsoha.oregon.gov.

Daacadnimo,



Dana Hittle

Agaasimaha Kumeelgaarka ah

Xafiiska Adeegyada Naafanimada Korriinka (Office of Developmental Disabilities Services, ODDS)

---

Isku diiwaangeli kolba wixii soo kordha xafiiska ODDS.

Ka akhri farriimaha Agaasimaha ODDS barta https://www.oregon.gov/odhs/agency/Pages/odds.aspx#dm.

Nagala soco Facebook-ga @oregonDHS.IDD.

Waxaad ku heli kartaa bilaash dukumintigaan isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay u qoran. Kala xiriir Oregon ODDS lambarka 503-945-5811 ama dd.directorsoffice@odhsoha.oregon.gov. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegaha La', Maqalka Ku Adag Yahay, Dhegaha iyo Indhaha La', dadka aragga la’ ama araggoodu hooseeyo. Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyeyaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.